

Sida looga ilaaliyo naftaada iyo dadka kale faafitaanka fayraska Corona (Covid-19)

- Ku dhaq gacmahaaga si joogto ah saabuun iyo biyo diiran
- Qufac iyo hindhista ku laab gacanta labadkeeda
- Ka fogow taabashada indhaha, sanko iyo afka
- Guriga joog haddii aad xanuun yar dareento si aadan u qaadsiiin dadka kale. Sug ugu yaraan laba maalmood ka dib markaad bogsato ka hor intaadan ku noqon shaqada ama skolka.
- Gaar ahaan waa muhiim in aan la qaadsiiin dadka da'da ah. Ha booqan guryaha waayeelka iyo cusbitaalada haddii ay daruuri tahay mooyee.



Dadka intooda badani uma baahna inay la xiriiraan daryeelka caafimaadka. Bogga [1177.se](https://www.1177.se) Waxaad ka heli kartaa macluumaad caafimaad oo dheeri ah iyo Hay'adda Caafimaadka Dadweynaha ama [Krisinformation.se](https://www.krisinformation.se) waxaad ka heli doontaa jawaabaha su'aalaha guud ee ku saabsan covid-19 oo (Iswidish iyo Ingiriis)

Akhri tan!

Adigu waa inaad iska joojiso tegista xafladaha iyo isku imaatinyada, xitaa kuwa qoyska iyo saaxiibada. Khatarta cudur faafintu way weyntahay xilliga xiriiryada dhow oo dhan.

Dadka gaboobay iyo kuwa xanuusanaya u gee raashin laakiin raashinka dhig albaabka hortiisa. Marka khatartan cudur faafintu dhamaato ayaad dib u kulmi kartaan.

Dadka oo dhan way sii gudbin karaan cudurkan inuu faafo oo sidaas dadka kale ku xanuusan karaan, caruurta iyo dadka waaweyn labadaba.

Dadka oo dhan mas'uuliyad gaar ah ayaa ka saaran in aanay sii fidin cudur faafintan – waad ku mahadsantahay inaad caawimaad ka geysato!